# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Waa maxay ereyada wax tara?

Ereyada wax tara waxay carruurta ka caawiyaan in ay sheegaan waxa ay u baahan yihiin ama rabaan. Qaar ka mid ah carruurta ay ku adag tahay in ay dadka kale la hadlaan ayaa laga yaabaa in ay garanayaan ereyada ku toosan midabyada, tirooyinka iyo qaababka. Waxaa weliba laga yaabaa in ay garanayaan magaacda xayawaanka, magaacda cuntada ama magaacda waxyaabaha ay jecel yihiin.

Waalidiinta ayaa badi carruurta bara magaacda waxyaabaha maxaa yeelay waxaa muhiim ah in la barto magaacda waxyaabaha. Laakiin garashada magaacdu marwalba kama dhigna in ilmuhu uu ereyadan isticmaali karo si ay u weydiistaan waxyaabaha ay rabaan ama u baahan yihiin.

Haddii ilmuhu uu dhihi karo "moos" marka aad weydiiso, "Waa maxay waxani?", laakiin aanay dhihi karin "moos" marka ay mid rabaan, si waxtar leh uma isticmaalayaan ereyga.

### Waa kan tusaalaha ereyga wax tara:

Haddii ilmuhu uu yiraahdo, “fadlan caano” ereyga wax tara waa “caano”.

Haddii ilmuhu uu yiraahdo “fadlan” keliya adigu ma garanaysid waxa ay rabaan.

Haddii ilmuhu uu yiraahdo “caano” adigu waxaad garanaysaa in ay rabaan cabbitaan caano ah.

### Sida aad ilmahaaga uga caawinayso in ay fahmaan ereyada wax tara

Haddii ilmahaagu uusan ereyada weli dhihin ama isticmaalin, ama ay isticmaalaan uun ereyo kooban, waxaa laga yaabaa in ay adiga ku tusaan waxa ay rabaan iyagoo isticmaala jirkooda, codkooda, indhahooda ama muuqaallada wajigooda. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in ay eegaan waxa ay rabaan, farta ku fiiqaan shayga ay rabaan ama wax gacanta u fidiyaan.

Haddii aad garanayso waxa uu ilmahaagu rabo, waa in aad sheegto ereyga ku toosan. Waxaa tan lagu magacaabaa tusaalaynta hadalka wax tara.

Tusaale ahaan, haddii ay moos farta ku fiiqaan, adigu dheh “moos” marka aad sare u qaaddo iyo marka aad iyaga siiso. Haddii ay koob ku siiyaan, adigu dheh “biyo” ama “cabbitaan”.

Ereyadan “moos”, “koob” iyo “cabbitaan” waa ereyo wax tara.

Tusaalaynta ayaa ilmaha ka caawisa in ay bartaan ereyga wax tara maxaa yeelay waxay ku toosan yihiin waxa uu ilmahaagu ku weydiisanayo.

Ilmaha ha ku amrin in ay ku daydaan ama kaa daba yiraahdaan hadalkaaga.